QAADASHADA DAAWADA SI LOOGA HORTAGO CUDURKA QAAXADA (T.B.)



Wargelin Adiga Laguugu Tala Galay

CUDURKA QAAXADU WUXUU KA YIMAADAA JEERMIS

Maxaan ugu baahanahay daawo si aan uga hor tago cudurka Qaaxada?

Baadhitaanka maqaarkaaaga ayaa togane ahaa ama waxaad ku dhawaatay qof Cudurka Qada leh, ama adigaaba qaaxo hore u qabay oo aan iska daaweyn.

Taasu waxay ka dhigantahay Cudurka Qaaxada jeermiskiisa ayaa malaha jidhkaaga ku jiray.

Sideen u qaaday jeermiska Cudurka Qaaxada?

Qof cudurka qaaxada sambabada ku leh ayaa laga yaabaa inuu hindhisooday ama qufacay oo markaa adiga neeftaadu ay cudurka qaaxada jeermiskiisa u qaaday sambabadaada.



Maxaa ka dib dhaca?

Jidhkaaga ayaa jermiskaa la dagaalama kuna wareejiya gidaar agagaarka jeermiskaas.

Gidaarkani wuxuu jeermiska ka joojiyaa si uuna ugu fidin sambabada ama qeybaha kale ee jidhkaaga.

Sawirka xabadkaaga uu dhakhtarku kaa qaaday iyo

baadhitaanka kale ee uu sameeyey ayaa tusaya in uusan jeermisku ku fidin jidhkaaga.

Qof buka uma ekid mana garanaysid in jermis uu kugu jiro.



Jeermisku jirro miyey igu ridi karaan?

Haa, haddii jeermisku uu fido Mar marka qaarkood gidaarka ayaa dilaaca marka:

* aad cudur kale la jirrantahay
* aad murugeysantahay
* aad gaboobaysid

Markaad waxan isku aragto Qaaxaa ku haysa.

Daawadu maxay tartaa?

Daawadu waxay dishaa gidaarka jeermiska ah ee dhismay inta uuna fidin ka hor.

Daawada aan u baahnahay maxay tahay?

Waxaa la yidhaahdaa daawadaas INH (isoniazid).

Waxaana la helaa iyada oo kiniin ah ama la cabbo (syrup). Inta badan fiitaamiin ayaa lala qaataa.



Muddo intee dhan

ayaan qaataa daawadaas?

Waxaad qaadanaysaa daawadaas ha' sano.

Jeermiska cudurka qaaxadu wuu xoog weyn yahay. Daawadu in jeermiskaa ay disho bilo badan ayey ka qaadan.

Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona markaad qaadato in kugu filan.

Habkeebaan u isticmaalaa daawada?

Waxaa tagama maalmaan an in aad maalin kasta qaadato daawada, haddii kale waxba kuumee tarayso.



Qaado daawada maalin kasta saacad go'an.



Xanuun miyey ii keeni kartaa daawadu?

Inta badan dadku dhibaato ma dareemaan, laakiin dadka qaarkiis xanuun ayey dareemaan.



Dhakhtarkaaga markaaba wac haddii:

* aad yalaalugootid ama mantag uu ku qabto
* aad cunto xumo isku aragtid
* aad kaadi madow isku aragtid
* aad isku aragto maqaar huruud/jaale ah
* aad isku aragto indho huruud/jaale ah
* aad turturuq ka dareentid faraha iyo suulasha

Cudurka qaaxada miyaan qaadi karaa ka dib markaan qaato daawada?

Dadka si joogto ah daawada maalin kasta u qaata sida uu dhakhtarku ka codsaday cudurka qaaxadu si sahal uma qabto.

Dadka maalin kasta daawadooda aan qaadan waxaa dhici karta inuu cudurka qaaxadu qabto mustaqbalka.
Fadlan qaado daawadaada maalin kasta.

Daawada miyaa la iibsadaa?

Kiniinku waa <u>lacag la'aan</u> haddii uu dhakhtarkaagu ka codsado Waaxda Caafimaadka Dadweynaha.

Daawo kugu filan muddo saddex bilood ah ayaa lagu siin doonaa

Marka aan u baahdo daawo dheeraad ah maxaan sameeyaa?

Fadlan ogeysii dhakhtarkaaga saddex todobaad inta daawadu ayna kaa dhammaanin ka hor.

Muddo ayey ka qaadan dakhtarkaaga inuu kuu helo daawo lacag la'aan ah.



Haddaad qabto su'aalo la hadal kalkaaliyaha caafimaadka ee Cudurka Qaaxada ee Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee ku yaala degmadaada.

Downtown Health Area: 392-7420

Northeastern Health Area: 392-0927

Western Health Area: 392-0884

Adapted and distributed by the
Public Health Department, City of Toronto,
from material originally produced by the
Ontario Ministry of Health,
with revisions by East York Health Unit,
and the Ontario T.B. Control Nurses Committee.

TORONTO

Public Health

Reproduced for the Public Health Department
by the City Clerk's Department.
Information and Communication Services Division, City of Toronto.

May be reproduced without permission provided proper credit is given.